

DAAWADAADA: Metoprolol ___mg

Maxaan u qaadanayaa daawadan? Waxaad leedahay dhiig kar. Dhiig karku waa halis hadii aan la iska daawayn. Wuxuu sababi karaa faalig iyo wadno xanuun. Waad u dhiman kartaa dhiig karka hadii aan lagaa daawayn.

Qaado 1 kiniin ah maalin kasta cuntada kadib.

Maxaan dareemi doonaa markaan qaato daawadan kadib? Mararka qaarkood waxaad dareemi kartaa saamaynta ay kugu keento daawadu. Saamayntu waa wax iska caadi ah hadaad dareento. Saamaynta qaar ay jidhkaaga ku keeni karto hadaanad la qabsan daawda Metoprolol waxa kamid ah dawakhaad, shuban, daal, cun cun yar ama barar ay ka dhasha cun cunkaa.

Saamaynta qaarkeed ma dhacdo badanka hadiise ay dhacdo waxay noqon kartaa halis. **Wac 911 ama aad qolka gargaarka degdega ah isla markiiba haddii aad isku aragto: finan; barar wejiga, bushimaha, carrabka ama cunaha; ama, dhibaato ku qabato xaga neefsashada.**

Maxaa kale ee aan u baahanahay inaan ogaado?

1. Waa inaad qaadata daawadan maalin walba xataa hadaad caadi dareento.
2. Waa inaad dib usoo qaadataa daawadan bil kasta.
3. Haddii aad booqato xafiiska dhakhtar kale, xarun caafimaad, ama qolka gargaarka degdega ah, u sheeg inaad leedahay dhiig kar oo aad qaadata daawada Metoprolol.
4. Haddii lagaa baadho inaad waajahayso dhibaato wadnaha oo halis ah, dhibaatooyinka wareegga dhiiga ama wadnaha oo istaaga ama aad leedahay taariikh hoos u dhac garaaca wadnaha oo kugu sababay inaad suuxdo ma qaadan kartid dawadan. Si deg deg ah ugu sheeg dhakhtarkaaga.
5. Haddii aad xasasiyad ku leedahay daawo kasta oo saamaynaysa wadnaha iyo qulqulka dhiiga ma qaadan kartid daawadan. Magaca daawadan wuxuu noqon karaa Atenolol. Si deg deg ah ugu sheeg dhakhtarkaaga.

“Macluumaadka ku jira halkan waxa loogu talo galay kaliya ujeedooyin macluumaad loomana qaadan karo talo khubaro caafimaad ahaan. Markasta weydii talada dhaktarkaaga ama adeeg bixiye daryeel caafimaad oo ku haboon wixii su’aalo aad ka qabtid xaalad caafimaad ama daaweyn.”